



Xaqiijinta Helida Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 2021-2022

Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb ayaa siiyo **Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD** qoysaskooda sannad walba bilowga sannad dugsiyeed walba. Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD ayaa siiyo warbixinta ugu muhiimsan ee la xiriirto, filashooyinka dabeecada, xaquuqaha iyo waajibaadyada ardayga iyo waalidnimada. Wixii sannad dugsiyeedka 2021-2022, degmada ayaa ku deeqeysa Xeerka Anshaxa Ardayga koronto ahaan ku aadan dhammaan qoysaska. Waxay ku ooli kartaa linkiga xigga, taas oo ay ku jiraan noocyada la turjumay: <https://www.dekalbschoolsga.org/student-support-intervention/student-relations>.

Haddii ay jiraan sabab walba aysan kuugu suurtoqaleynin gelitaanka nooca korontada ee Xeerkeena Anshaxa Ardayga, fadlan midkood soo wac **dugsiga canugaaga** ama Waaxda Xiriirada Ardayga ee 678-676-1811 si aad u heshid koobiga daabacan ee **Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 2021-2022**. Waxaad sidoo kale ku soo diri kartaa i-meel **studentrelations@dekalbschoolsga.org** iyo codsiga koobiga la daabacay. Fadlan ku dar magaca buuxo ee ardayga iyo dugsiga diiwaangelinta ee ay la jiraan codsigaaga iyo koobiga la daabacay ayaa lagu soo dirayaa ciwaanka koowaad ee ardayga ee feelka ku yaalo.

Sida waalid/masuul, adiga ayaa masuul ka ah aqrinta Xeerka Anshaxa Ardayga, dib u eegida si buuxdo iyo kala hadlida ardaygaaga. Warbixin muhiim ah ee ku jirto Xeerka Anshaxa Ardayga waxaa ku jiro:

- Ogeysiinta xaquuqaha waalidka iyo ardayga sida waafaqsan sharciga faderaalka, oo ay ku jiraan FERPA, PPR, ESSA, Qeybta 504 iyo IDEA;
- Ogeysiinta sharuudaha sharciga gobolka, oo ay ku jiraan waajibaadyada waalidnimada sida waafaqsan sharciga ka qeybgalka qasabka ah, wargelinta qasabka ah, ESSA iyo xaquuqda waalidka ee looga saarayo ardayga ka qeybqaadashada kooxyada iyo ururada;
- Xeerka Anshaxa Ardayga, iyo warbixinta la xiriirto nidaamyada edbinta waxaa ku jiro dhageysiyada Nidaamka Cadaalada Degmada iyo edbinta ardayga curyaanka ah;
- Filashooyinka isticmaalka intarneetka iyo cilmiga farsamada.

Saxiixida hoose, waan qirsannahay helitaanka **Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 2021-2022**. Tasmada dokumintiga, Tilmaamaha Edbinta, Sharciyada Anshaxa Baska, iyo Nidaamyada Badqabka ayaa dib u eegayo xubinta kulliyada ama shaqaalaha. Waxaan sidoo kale kala hadlayaa dokumintiga canugeyga oo sidoo kale waan fahamsannahay in canugeyga looga baahanyahay inuu ogaado tasmada **Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 2021-2022** iyo u hogaansanaanteeda iyo sharciyo walboo kale ee anshaxa looga baahanyahay dugsiga canugeyga inta lagu jiro inta lagu jiro waxbarashada qof ahaanta iyo onleenka. Waxaan sidoo kale ku doodayaa inaan weydiiyo xubnaha kulliyada iyo shaqaalaha xaqiijinta qeyb walboo Xeerka ee aanan fahmin. Waxaan sidoo kale fahamsannahay in qirsanaan la'aanta helitaanka **Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 2021-2022** aysan ka dhaafeynin canugeyga masuuliyad walba ee la xiriirto warbixinta ku jirto **Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 2021-2022**.

Waajibaadyada Ardayga ee Barnaamijka/Dugsiga Kuleelaha

Waxaan xaqiijinayaa in aan fahamsannahay in aan masuul ka ahay u hogaansanaanta dhammaan sharciyada, sharuudaha, nidaamyada, xeerarka, dawlada, deegaanka iyo sharciyada federaalka ee laga helo **Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD** inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2021-2022 iyo dhammaan barnaamijyada xiggo sannad dugsiyeedka 2021-2022. Waxaan kaloon fahamsannahay in isla markaas laygu qaadayo Heerarka Natijjooyinka ku qoran **Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 2021-2021** hadii laygu helo xadgudub walba oo sharciga ah inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2021-2022 iyo dhammaan barnaamijyada/dugsiga kuleelaha Dugsiga Degmada Gobolka Dekalb 2022.

Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb

Balanqaadka Amniga Dugsiga

Waxaan xaqiijinayaa oo waan fahamsannahay dooqyadeyda iyo ficiladeyda gaarka ah, marka ay ku soo bateen dhammaan ardaydaas kale Dugsiga Degmada Gobalka Dekalb ayaa isbedel sameynayo. Ayadoo la sharfayo balantaan, waxaan sameyn karaa qeybteyda si aan uga dhigno dugsigeena ammaan iyo guul.

Waxaan aamin sanahay in aan noqon karo arday fiican. Waxaan aamin sanahay in aan tusi karo dabeecad fiican. Waxaan aamin sanahay goortii aan dadaalo, in aan guuleysanayo, marka waan dadaalayaa maalin walbo si aan u sameeyo sida ugu wanaagsan. Waan baran karaa. Waan baranayaa. Si aan ugu caawiyo ku haynta dugsigeena badqab, waxaan balan qaaday in aan u hogaansanaado tilmaamaha laga aasaasay gudaha Xeerka Anshaxa Ardayda. Waan fahamsanahay in xadgudubka halista ah ee xeerarka dugsiga laga yaabo in ay keento toban (10) maalmood oo ganaax ah oo raaceyso nidaamka dhageysiga cadaalada Degmada. Nidaamkaan laga yaabo in ay keento natiijooyin dheeraad ah oo laga yaabo in ay ku jirto ka saarideyda dugsiga ama in laygu wareejiyo barnaamij/dugsi kale.

Waxbarashada Qasabka ah

Waxaan xaqiijinayaa oo aan fahamsanahay natiijooyinka iyo cawaaqiibaha ee u hogaansanaan la'aanta sharciyada gobalka ee Georgia oo laxiriira Waxbarashada Qasabka ah, Xeerka Ka soo qeybgalka Ardayga iyo Ka soo qeybgalka/Edbinta (ka fiiri boggoga 39 iyo 42 ee ku jiro *Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 21-2022* wixii warbixin dheeraad ah).

Ogolaanshaha Ardayga in uu ka qeybqaato sahanada

Sanad walbo Waaxda Waxbarashada Georgia waxay sameysaa sahanada ardayda fasalka 3^{aad} ilaa 12^{aad}. Mawduucyada la sahminayo waxaa ku jira daroogo, rabshado, arimaha caafimaadka maskaxda, caadooyinka wadista, jimicsiga iyo cuntada. Sahanada waa qarsoodi iyo looma baahno aqoonsiga gaarka ah. Sahanka wuxuu u ogolaanayaa Dugsiga Degmada in uu ka taageero iyo qiimeeyo baahida-barnaamijyada u soconayo ardayda. Ka qeybqaadashada sahanada waa ixtiyaar. Ka tixraac Illaalada Badelka Xaquuqaha Ardayga qeybta ee bogga 66 ee *Xeerka Anshaxa Ardayga DCSD 2021-2022* wixii warbixin dheeraad ah. Sahankaan waa gooni iyo wuu ka duwanyahay Hubinta Amniga Degmada, oo DHAMAAN ardayda laweydiinayo in ay buuxiyaan.

_____ Ma ogolaan ka qeybqaadashada canugeyga ee Waaxda Waxbarashada Georgia ee Sahanka Caafimaadka Ardayga Georgia.

_____ Waan u ogolaaday ka qeybqaadashada canugeyga ee Waaxda Waxbarashada Georgia ee Sahanka Caafimaadka Ardayga Georgia.

Magaca Ardayga _____ Saxiixa Ardayga _____

Magaca Waalidka _____ Saxiixa Waalidka _____

Lambarka Taleefonka Waalidka _____